

## Milicisga Geeska: Xildhibaan Donald Xaal Ha Siiyo Shacabka Somaliland

Thursday, 02 July 2009

"Waxa hubaal ah inaan samayn doono wixii karaankayga ah ee ah inaan ka dhigo go'oon. &hellip;. Waxa laga yaabaa inay Somaliland maalin uun go'aansan doonto inay qayb ka noqdaan midnimadii Somaliya..&rdquo;

Ereyadan waxa ku tiraabay Guddoomiyaha guddiga Golaha Wakiilada Maraykanka u qaabilsan arrimaha Afrika Xildhibaan Donald Payne, oo toddobaadkan hadal ka jeediyay shir lagu qabtay magaalada Washington ee dalka Maraykanka oo lagaga hadlayay amniga iyo budhcad badeedka Somaliya,

Hadalkaas cadhada ah, ee ka soo baxay Xildhibaan Donald Payne, waxa uu kaga jawaabayay go'aan ay xukuumadda Somaliland ku diiday casuumad uu u fidiyay oo uu ku weydiistay inay ka qayb gallaan shirkaas. Waxaanay sheegtay inay Somaliland sharaf dhac ku tahay inay ka qayb gasho shir ay ku kulmayaan kooxaha Somaliya oo ay madaxbanaanideeda kala soo noqotay 18 sannadood ka hor, ka dib dagaal qadhaadh oo uu ururkii SNM la galay dawladii Maxamed Siyaad Barre ee ka talin jirtay wixii la isku odhan jiray Jamhuuriyaddii Somaliya. Ma odhan karno xildhibaan, hadalkiisa hanjabaadda ah waxa ka keenay ogaanshiyo iyo xog la'aan la xidhiidha Somaliland, waayo wuxuu ka mid ahaa wefti ka socday dawladda Maraykanka oo booqasho ku yimid Somaliland dabayaaqadii sagaashamaadkii. Laakiin waxa muuqata inuu u badheedhay xaqiraada iyo meel ka dhaca uu u gaystay rabitaanka malaayiinta reer Somaliland oo go'aansaday inay noqdaan qaran xor ah oo madaxbanaan oo ka tashada aayahooda, ka dib midnimadii bilaa shuruuda ahayd ee ay eeddeen, ee ay la galleen walaalahoodii koonfurta Somaliya ee uu Talyaanigu gumaysan jiray, 1 Julay, 1960, oo ahayd afar maalmood ka bacdi markii ay Somaliland xorriyadeeda ka qaadatay gumaystihii Ingiriiska. Sida laga warqabo shirkani ma ahayn kii u horeeyay ee ay Somaliland diido ka qayb galkiisa, balse waa kii u dambeeyay ee qiyaastii in ka badan labaataneeyo ku dhawaad shir oo la isugu keenay Somali, kuwaas oo caalamku garawsaday inaanay Somaliland ku dhex milmin kooxaha Somaliya, maadaama oo ay tan iyo wixii ka dambeeyay burburkii dawladii Siyaad Barre ay ku naaloonaysay nabadgelyo buuxda iyo nidaam dawladeed. Intaas oo shir waxa ay shacabka Somaliland uga qayb geli waayeen, waxa uu ahaa iyagoo u arkay inaanay dantoodu ku jirin.

Dhinac kale haddii aynu ka eegno, hadalada xildhibaanada oo u muuqda sandulayn uu ugu sheegayo shacabka Somaliland inuu ku khasbayo waxaanay raali ka ahayn, waxay baalmarsanyihiin hanaanka Dimuqraadiyadda oo sida wadamada uu dalkiisu horumuudka ka yahay ay sheegaan inay mudnaanta koowaad siiso rabitaanka shacabka, maadama oo ay Somaliiland ku timid doonista shacabka. Sidaas awgeed, ma mudnayn in xildhibaan ka tirsan dal sheegta Dimuqraadi iyo ilbaxnimo uu ka horyimaado una hanjabo dad masiirkooda ka tashaday oo go'aan ka gaadhay waxaan dan u ahayn. Inkastoo aanu Maraykanku aqoonsanayn Somaliland, haddana waxa ka dhexeeya macaamil wanaagsan oo la xidhiidha dhinacyada nabadgelyada iyo siyaasadda gobalka Geeska Afrika, waxaana taas markhaati ka ah booqashadii ay Somaliland ku timid sarkaalkii Maraykanka ugu sareeyay siyaasadda Afrika Ms. Jendayi Frazer horaantii sannadkii 2008. Hadalkan isugu jiray handadaada, yaska iyo xaqiraada, ee ka soo baxay dibnaha Xildhibaan Donald Payne, waxa uu si weyn u dhibay shacabka Somaliland ee marka ee marka horeba bulshada caalamka ka tirsanayay godob, waxaana inta badan hadalkaas qadafka ah lagu hadal hayay goobaha lagu kulmo ee ay bulshadu xogta isku dhaafsato.

Sidaas daraadeed, xukuumadda Somaliland, Goleyaasha Baarlamaanka xisbiyada mucaaradka iyo shacabkaba, waxa la gudboon inay dareen isku mid ah kaga jawaabaan tallaabo lagaga hortagyo hanjabaaddiisa islamarkaana lagu muujinayo sida looga xunyahay weedhahaas uu xildhibaanu ula badheedhay umad aayaheeda ka tashatay, iyadoo la samaynayo dibad baxyo jawaab u ah kelmadaha aanay u qalmin. Sidoo kale, waxa xildhibaan Donald Payne, la gudboon inuu raali gelin iyo cudur daar ka bixiyo hadalkiisa aanu u meel dayin ee ay ka muuqatay cadhada iyo caadifadu, islamarkaana uu xaal siiyo malaayiinta reer Somaliland ee uu ku gefay, hana ogaado inaanay ahayn umad sandule iyo hanjabaada u nugul.

Wargeyska Geeska Afrika [www.geeska.net](http://www.geeska.net)